



Farshaxanka ardayda oo lagu qurxiyay derbiyada xafiiska degmada

Soo booqdayaasha [Xarunta Adeega Waxbarashada Blanchard](#) waxaa laga yaabaa in ay degdegsan yihiin si ay u gaaraan kulan ama ganacsiga qaarkood oo ay rabaan in ay si dhakhso ah uga qayb galaan. Laakiin waxaan qof kasta oo booqanaya xafiiska dhexe ee Dugsiyada Dadweynaha Portland ku dhiirigelinaynaa in ay waxoogaa hakadaan oo ay fiiriyaan derbiyada.

Waxaa jiri doona qaarka ka mid ah farshaxan wanaagsan oo ay sameeyeen ardayda PPS, oo ka socda heerka kasta oo fasal iyo da'deed.

Farshaxanka waxaa lagu soo bandhigay hoolka muhiimka ah, iyo dabaqyada sare ee hoolasha la maro ee aada xafisiyada maamulka iyo kheyraadka dadweynaha. Qaybaha farshaxanku ka kooban yahay waxaa la bedelaa dhowr jeer sanadkii.

Qayb kasta oo farshaxanka ka mid ah wuxuu leedayay warqad wax sharxaysa oo lagu garanayo magaca ardayda farshaxanka ah, magaca farshaxanka, dugsiga, heerka fasal iyo macallinka. Waxaa sidoo kale jirta sharaxaad kooban, oo uu sida caadiga ah qoray macallinku, oo ka hadlaysa waxa uu farshaxanku yahay iyo sida loo sameeyay.

Tusaale, farshaxanka cinwaankiisu/magaciisu yahay "[Citrus Gothic](#)" ee ay sameysay ardayada sanadkii u dambeeyay dhigata Dugsiga Sare ee Grant ee Natalia Peterson, warqada wax sharxaysa ee macallinka Melody Rockwell waxay bixinaysaa sharaxaad:

"Shaqqadani waxay ku saleysan tahay iyada oo la isticmaalayo sawir dhaqanka cusub 'pop-culture' ka hadlaya oo aan dhab ahayn ama mala awaalka ah isla markaana loo isticmaalay mashruuca farshaxanka . Pop-Surrealism waa dhaqdhaqaaq dhanka farshaxanka ah oo oo si Hoose Koonfurta California uga jiray sanadihii '70-meeyadii iyo '80-tanadii. Shaqqadan waxaa loogu talagalay in la abuuro jawaab xoogan oo dareen leh. Mashruuca wuxuu sidoo kale diiradda saarayaa wax isku darid la isticmaalayo khadad, qaabab iyo midab si loo abuuro muuqaal isku dheelitiran."

Noocyada farshaxaniistayaashu waxay muujinaysaa kala duwanaanshaha ballaaran ee horumarinta dhanka farshaxanka, iyada qaar ka mid ah qaybaha farshaxanka ee ugu wanaagsanaa ay sameeyeen farshaxaniistayaal da'doodu yar tahay. Tusaale, waxaa jira "[Winter Bird](#)" oo ay sameysay ardayada fasalka labaad dhigata Dugsiga Laurelhurst ee Amiayah Lambert. Iyada oo la eegayo warqada wax sharxaysa ee macallinka Hanne Duncan:

"Ardaydu waxay abuureen mashruuca farshaxan isku dhafan iyaga oo isticmaalaya rinqiga madow ee tempera si ay sameeyaan geedka keynta ku yaala ee birch iyaga oo isticmaalaya kaar balaastik ah si rinqiga loo saaro warqada. Ka dibna waxay isticmaaleen qallin saliid/budo ka sameysan 'oil pastel 'si ay u abuuraan tilmaan cad oo dareen leh oo loogu talagalay jirka shimbirta, baalasha, madaxa iyo dabada, waxayna farshaxanka u isticmaaleen biyo 'water color'. Ardayda waxay shaqada farshaxanka u qabteen si wadajir ah si ay u abuuraan shimbir ku jirta wakhti jiilaal ah, iyo geedka keynta ku yaala ee birch."

Haddii aad jeelaan lahayd in aad aragto tusaalooyinka farshaxanka la soo bandhigay, bogga PPS Facebook ayaa laga helayaa tusaalooyinka qaybaha farshaxanku ka kooban yahay ee ay sameeyeen [ardayda dugsiga hoose](#) iyo ardayda dhigata [Dugsiga Sare ee Grant](#). Ama ka sii fiican, marka xigta ee aad ganacsi ku yeelato BESC, wakhti hore kaalay, ama oggolow wakhti ka dib marka ganacsigaagu aad sameyso oo fiiri sida Waxbarashada [Farshaxanka ee Portland iyo Canshuurta Gelida Dakhliga.](#) ay gacan uga geysatay horumarinta farshaxaniistayaasha da'doodu yar tahay ee magaalada.